# Hannaanka Daryeel Bixiyaha Cusub

| | Shaqaalaha Daryeelka Guriga (HCW-yada) | Shaqaalaha Taageerada Shaqsiga (PSW-yada) | Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed (PCA-yada) |
|---|---|---|---|
| **1. Gudbi Codsi**<br>Buuxi oo u dir codsiga hay'ada aad la shaqeyn doonto. Kala xiriir hay'ada haddii aad wax su'aalo ah qabto. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsiyada ka heli kartaa barta [www.ohccworkforce.org/applications](http://www.ohccworkforce.org/applications). | Ka codso Aging and People with Disabilities (Dadka Waayeelka iyo Kuwa Naafada ah) (APD). | Ka codso Office of Developmental Disabilities Services (Xafiiska Adeegyada Naafonimada Korriinka) (ODDS) ama xafiiska Dillaaleyda Adeegyada Taageerada Dadka Wawayn. | Ka codso Comagine. |

## 2. Sug Baaritaanka Taariikhda Qofka

Ka dib markaad dirto codsiga, hay'ada ayaa bilaabi doonta baaritaanka taariikhda. Mararka qaar waxaad u baahan kartaa inaad soo gudbiso faro si loogu sameeyo baaritaanka taariikhda. Fadlan ogoow baaritaanka taariikhda qofka waxay qaadan karta dhowr toddobaad. Baaritaanka taariikh dambiyeedka waxaa ka shaqeeya Background Check Unit (Laanta Baaritaanka Taariikhda Qofka) (BCU) oo isticmaasha nidaam lagu magacaabo ORCHARDS. Wixii su'aal ah, kala xiriir hay'ada aad codsiga u dirsatay.

## 3. Xaadir Tabbabarka Shaqo

Inta aad sugeyso natiijooyinka baaritaanka taariikhdaada, waxaad xaadiri kartaa Tabbabarka Shaqo ee waajibka ah ee 6-da saacadood socda ee laga qaato Carewell SEIU 503 Training. Waxaan ku talinaa inaad qaadato Tabbabarka Shaqada isla marka aad soo gudbiso codsiga. Waa inaad ku qaadato Tabbabarka Shaqada 45 maalmood gudahooda ka dib markaad gudbiso codsigaaga.

Carewell SEIU503

| | Shaqaalaha Daryeelka Guriga (HCW-yada) | Shaqaalaha Taageerada Shaqsiga (PSW-yada) | Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed (PCA-yada) |
|---|---|---|---|
| **4. Hel Lambarka Daryeel Bixiyaha**<br>Kadib marki la bogo baaritaankaaga taariikh dambiyeedka, waxaad heli doonta lambarka daryeel bixiyaha. | Lambarka daryeel bixiyaha waxaa lagu soo diraa iimaylka iyo/ama boostada. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad hesho oo aadna dib u eegto liiska hawlaha kahor inta aadan shaqo bilaabin. | Lambarka daryeel bixiyaha waxaa lagu soo diraa iimaylka ama boostada. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad saxiixdo heshiiska adeegga kahor inta aadan shaqo bilaabin. | Lambarka daryeel bixiyaha waxaa lagu soo diraa iimaylka. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad saxiixdo liiska hawlaha kahor inta aadan shaqo bilaabin. |

## 5. Dhameystir Tabbabarka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Cusub Qaybta 1 iyo Tabbabarka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Cusub Qaybta 2

Kadib marka aad hesho lambarkaaga daryeel bixiyaha, waxaad ka samayn kartaa inta hadhay ee Tabbabarka Shaqaalaha Cusub bogga intarnetka ee barashada. Waa inaad ku dhamaystirto 8-da saacadood ee hadhay 120 maalmood gudahooda ka dib markaad heshid lambarkaaga adeeg bixiyaha.

## 6. Shaqo Raadi

Diyaar ma u tahay macmiilkaaga ugu koowaad? Iska diiwaangeli Carina, agabka shaqo ku beegida ee laga helo Carewell SEIU 503 oo ka dhex raadso boqolaal kamid ah macaamiisha daryeelka guriga ee Medicaid iyo Barnaamijka Dadka Waayeelka ah Lagu Taageero ee Oregon (OPI). Isticmaal Carina si aad ugu raadsato shaqooyinka maalinta dhan ah, niska ah, iyo daryeelka bukaanka muddada gaaban ee deegaankaaga. Wax badan ka baro barta CarewellSEIU503.org/so/Carina.

## Carewell ayaa diyaar u ah inay kugu caawiso tallaabo kasta oo aad sii qaado.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo luuqadeed sida turjubaan ama aad qabto wax su'aalo kale ah oo ku saabsan tabbabarkaaga, kala xidhiidh Carewell SEIU 503 lambarka 1 -844 -503 -7348 ama CarewellSEIU503Training@RISEpartnership.com.

cwt_flyer_20250213_New Worker Process Flow_so